

**Xeerka L. 17. rep.**

**Aasaasidda Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya.**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay dekeretada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 9 Dicember 1952, lamba. 2357;

Marka uu arkay dekereetadiisa ku taariikhaysan 30 Juun 1952, lamba. 160;

Marka uu arkay dekereetadiisa 1 Jannaayo 1956, lr.16 ee ku saabsan baabi'inta Ciidanka Nabadgalyada Soomaaliya;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in lagu baddalo maamul ku meelgaara oo leh masuuliyadda waxqabadka dhammaan hay'adihii qaybta ka ahaa Ciidankii la baabi'iyay, marka laga reebo kuwa Cirka, illaa waqtiga lagu soo wareejinayo Ciidanka Boliiska iyo la nidaaminayo hawlihii laga soo xigtay Ciidankii Navagalyada;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA:**

**Qod. 1**

Ciidamadi Mileteriga ee ka mid ahaa Ciidankii Nabadgalyada Soomaaliya, marka laga reebo kuwoodi Cirka, laga bilaabo 1 Jannaayo 1956 waxaa lagu meeleyay maamulka ciidan ee loo bixiyay Xoogga Dalka Soomaaliya.

**Qod. 2**

Ciidanka Xoogga Dalka wuxu u xilsaranyahay in uu hubiyo habsami u socodka iyo hawlgalka qaybaha uu ka koobanyahay iyo in uu si tartii-tartiiba u fuliyo dhalan-rogga ujeedooyinka lagu sheegay D. A. ee 1 Jannayo 1956, lamba. 16.

**Qod. 3**

Marka la fuliyo hawlaha dhalan-rogga iyo kalaguurka hay'adaha ay ka tirsanaayeen, Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya wuxuu ka koobnaanaya Xaafiiska la soo xigtay isagoo ka tirsanaanaya Hoggaanka Arrimaha Maaliyadda lana wareegaya xilalkii iyo shaqaalihii Qaybta Arrimaha Maamulka Miletariga.

Shaqaalaha Xaafiiska la soo xigtay waxaa laga maamulayaa Taliska Ciidanka Boliiska Soomaaliya.

Isla taariikhdaas Qaybta Arrimaha Maamulka Miletariga waa la baabi'iyay.

Muqdisho, 1 Jannaayo 1956.

Maamulaha

**Anzilotti**

La hubiyay lana Diiwngaliyay – Diw, lamba. 14 – bogga lamba. 190

Mogadisho, 1 Jannaayo 1956.

Hantdhowraha Guud: **Spadaro**